NORTHWEST FAMILY CLINICS

**Ogolaanshaha Daaweynta**

**OGOLAANSHAHA DAAWEYNTA**: Saxiixida foomkaan, waxaan ogolaanayaa oo ansixinayaa Rugaha caafimaadka Qoyska Northwest si ay ii daaweeyaan. Waan fahmay in tan ay ku jireyso waxbarashada, maareynta daawooyinka, sheybaarada, raajada, iyo habraacyada. Waan fahmay in dhakhtarkayga uu diyaar u yahay inuu sharaxo ujeedada daaweynta iyo habraacyada iyo inaan xaq u leeyahay inaan diido daaweynta lagu taliyay.

**WAREEJINTA FAA'IIDOOYINKA (ASSIGNMENT OF BENEFITS) iyo OGGOLAANSHAHA BIIL-GAREYNTA**: Waxaan halkaan ka codsanayaa in lacag bixinada faa'idooyinka caymiska la ansixiyay in si toos ah loogu sameeyo Northwest Family Clinics oo matalaadeyda oo adeegyo walba aan ka helo xaruntan. Waxaan u oggolahay inay Northwest Family Clinics u siideyso diiwaanadeyda caafimaadka iyo warbixinta kale ee la xiriirta adeegyadeyda daryeelka caafimaadka si loogu bixiyo ujeeddooyinka howlaha daryeelka caafimaadka.

**U SIIDEYNTA WARBIXINTA LACAG BIXIYAHA IYO SHABAKOOYINKA**: Waxaan u ansixinayaa Northwest Family Clinics inay sii daayaan diiwaannada caafimaadka ee la codsaday iyo warbixinta kale ee la xiriirta adeegeyda daryeelka caafimaadka Medicare, wakiilladeeda, shirkadeyda caymiska, ama ururka daryeelka caafimaadka (HMO), lacag bixiyeyaasha kale, ururada shabakada lacag bixiyeyaasha, oo ay ku jiraan ururada daryeelka ee masuulka ah, qandaraaslayaashooda, maamulayaasha dhinaca sadexaad, hay'ada caafimaadka ee gobolka, ama lacag bixiye kasta oo kale oo dawladeed sida loogu baahdo lacag bixinta iyo hawlaha caafimaadka. Wixii dabagal ah ama ku wargelinta dhinacyada sadexaad oo lagama maarmaan noqota sababtoo ah haraaga aan la bixin ee akoonkaaga waa inaan loo tixgelin jebinta asturnaanta.

**HESHIISKA LACAG BIXINTA**: Waxaan qirayaa oo aan faham sannahay inaan masuul ka ahay dhammaan qarashaadka la xiriira adeega (adeegyada) la ii siiyay nafteyda ama qof aan ku tiirsanahay. Haddii, ay sabab walba ku dhacdo in shirkadda caymiskeyga ay u aragto adeegyada gaar sida kuwa aan la daboolneyn ama aanan bixin qeyb walba oo biilkeyga, ama haddii, aanan laheyn caymis shaqeynaya, waxaan qaadanayaa masuuliyad buuxda oo ku saabsan lacag bixinta kuwaas iyo dhammaan qarashyada kale ee adeegyada la bixiyay. Dhammaan lacag bixinta la wadaago, caymis wadaaga, iyo lacagaha laga jari karo waa in la bixiyaa waqtiga adeega. Waxaan aqbalnaa lacag cadaan ah, jeegag, kaararka credit iyo/ama debit. Waxaa jira khidmada adeega oo ah $45 oo loogu tallagalay jeegagga soo celinta ama kaararka deynta ee dib loogu dalaco. Haddii daruufaha u baahdaan isticmaalka hay'ada arurinta dhinaca sadexaad, Waan fahmay inaan masuul ka noqonayo

lacag bixinta qarashka aruurinta, qareenka, iyo/ama qidmooyinka maxkamadda. Qidmooyin walba waxaa loo isticmaalayaa haraaga aruurinta. Hay'ada aruurinta ayaa sidoo kale ku wargelin karto akoonkaaga deynta xafiiska deynta.

**XAQUUQDA BUKAANKA EE ASTURNAANTA**: Saxiixida foomkaan, waxaan qirayaa inaan helay koobiga ama la ila socod siiyay Siyaasadaha Asturnaanta Northwest Family Clinics'. Waan fahmay inaan codsan karo koobiga ogeysiinta asturnaantan.

**BUUXINTA DAAWADA QORAALKA IYO DAAWOOYINKA LA XAKAMEEYO**: Northwest Family Clinics waxay bixisaa buuxinta daawada ku filan iyo daawada qoraalka la cusbooneysiiyay waqtiga balantaada. Adiga ayaa masuul ka ah raadraaca saadka daawooyinkaaga oo balansanayo balan ka hor intaysan daawada dhammaan. Waa inaad la xiriirtaa farmashigaaga si aad u gudbiso codsiga buuxinta daawada oo u ogolow sugitaan ugu yaraan 72 saacadood (3 maalmood shaqo) oo codsigaaga ah.

**BALAMAHA LA SDEEGAY IYO GOOR DAMBE LA BAAJIYAY**: Waan qirsanahay in haddii aanan baajin balanteyda ugu yaraan 24 saacadood ka hor ama aanan imaan balanteyda ay hor isaageyso in kuwa kale la ballamiyo. Waan fahmay in dalacaad $50 oo balamaheyga iyo $100 oo habraacyada ayaa lagu soo dalacayaa akoonkeyga oo balanta la seegay ama goor dambe la baajiyay. Baaritaanka mandhicirka waa in la baajiyaa ugu yaraan 7 maalmood ka hor ama dalacaad $300 ayaa lagu soo dalacayaa oo baajinta goor dambe ee balanta. Intaa waxaa dheer, waxaan faham sannahay in Northwest Family Clinics ay xaq u leeyihiin inay joojiyaan daryeelkeyga ama ay i geliyaan xayiraad balan oo isla maalintaas ah oo sadex balan ama ka badan la seego ama la baajiyo goor dambe iyadoon la isi siin ogeysiis 24-saacadood oo muddo 12-bilood gudahood ah.

**DALACAADYADA KALE EE LAGA YAABO IN LA GALO**: Haddii Northwest Family Clinics la weydiisto inay buuxiyaan foomam dheeraad ah ama wargelino adiga kugu socdo, waxaa jiri kara qarashyo dheeraad ah. Qidmooyinkaan looma soo dirayo shirkada caymiskaaga oo horay ayaa loo bixiyaa. Northwest Family Clinics ayaa laga yaabaa inay ku dalacaan qidmooyinka sida laakiin aan ku xadidneyn foomamka naafada, foomamka FMLA, nuqulada diiwaanada caafimaadka, wargelino gaar ah, isgaarsiinta elektarooniga, ama la talinta taleefonka.

**OGEYSIISYADA ELEKTAROONIGA AH**: Bixinta lambarkeyga taleefonka, cinwaanka i-meelka, ama warbixin walboo xiriirka kale oo gaar ah, waxaan u ansixiyay Northwest Family Clinics iyo wacyigelinta tooska ah ee dhinacooda sadexaad iyo nidaamka fariimeysiga inay isticmaalaan warbixinta xiriirkeyga. Si aad igala soo xiriirto xasuusinta balanta, natiijooyinka sheybaarka, warbixinta haraaga akoonka, warsideyaasha, aqbaaraha guud, iyo hawlaha kale ee la xiriira daryeelka caafimaadka. Waxaan ogolahay inaan u oggolaado farriimaha sharaxan ee looga tagay fariin codeedkeyga, ama shaqsiga hoos ku qoran, haddii aanan la heli karin lambarka aan aniga bixiyay.

**ANSIXINTA LOOGA HADLAYO WARBIXINTA CAAFIMAADKA**: Waxaan halkaan u ansixinayaa bixiyayaasha caafimaadka iyo shaqaalaha Northwest Family Clinics inay kala hadlaan macluumaadkeyga caafimaadka ee la ilaaliyo ee magaca (magacyada) la illaaliyay ee hoose. Uga tagida aagaan si banaan, bixiyayaasha iyo shaqaalaha ma wadaagayaan warbixinteyda caafimaadka la ilaaliyo.

| **Xiriirada** | **Magaca** | **Taleefonka #** |
|---|---|---|
| ______________________ | ______________________ | ______________________ |
| ______________________ | ______________________ | ______________________ |

**Adoo saxiixayo foomkaan, Waan qirayaa inaan aqriyay oo ogolaaday dhammaan kuwa kore. Waan fahmay in ogolaanshahaan uusan dhaceyn illaa aan uga laabto qoraal ahaan. Waan fahmay inaan xaq u leeyahay inaan ka noqdo ogolaanshaheyga waqti walba iyo in ka noqoshadeyda aysan wax saameyn ah ku yeelaneyn tallaabooyin walba ee la qaaday ka noqoshadeyda ka hor.**

Magaca Bukaanka (DAABAC): ____________________________________________ Taariiqda Dhalashada: ______________

____________________________________________ ______________________

Saxiixa Sharciga ah ee Bukaanka, Waalidka, ama Wakiilka Taar